

Sooyaalka qoraalka afsoomaaliga

Afkasoomaaligu waa af balaadhan , erayadiisuna badanyihiin, dhan loo eegabahadal iyo hawraar, maanso iyo maahmaah,gabay iyo geeraar,masaf iyo madadaalo,hees iyo heeloqorriin iyo qun u hadal,gees loo dayaba waa af hodana,

Sooyaalka Qoraalka Afsoomaaliga

1.HORDHAC

Afka Soomaalidu waa af baallaadhan, erayadsiisuna badan yihiin, dhan loo eegaba hadal iyo hawraar, maanso iyo maahmaah, gabay iyo geeraar, masaf iyo madadaalo, hees iyo heello,qorriin iyo qun-u-hadal, gees loo dayoba waa af hodona, oo murti macaan ka buuxaan, qoto dheeri iyo qaayana Eebbe weyne u yeelay, dadka ku hadlaana ku kalsoonyihiin, dantooda iyo waxay doonayaana ku sheegankaraan. Eray walba oo erayadiisa kamid ahi wuxuu leeyahay dhawr eray oo la mid ah ama la macno ah. Eray walba waxaa ka abuurma dhawr eray oo kale. Afka Soomaaligu wuxuu kamid yahay afafka lagaga hadlo Geeska Afrika.

Xagga afafka addunku qaybaha ay u kala baxaan, af-Soomaaliga waxa lagu tiriyaa inuu ka tirsan yahay bahyarta Kushitigga Bari (Eastern Cushitic) ee ka mida laanta Kushitigga ee qoyska Hamito-Semitic-ga. Afafka qoyska Hamito-Semitic-ga sida caadada ah waxa loo sii kala qaybiyaa laamo ka wakiila lahjado kasoo farcamay afkii waalidka ee asalka ahaa, waxayna kala yihiin Semitic, Egyptian, Berber, Cushitic iyo Chadic.

Dadka afafka baadhaa waxay leeyihiin in uu kamid yahay afafka reer Xaam, gaar ahaan "Kuush", xidhiidh dheerna wuxuu la leeyahay afka Gallaha."

Sidaas waxaa hordhac ama arar kadhigay mid kamida buugaagta ka nabad gashay buruburkii *diwaanka Soomaalida ee sannadihii 1990 - 2001*. Buugaas oo sannadkii 1973 ay qortay wasaaraddii Hiddaha iyo Tacliinta Sare ee Soomaaliya waagaas.

Afka soomaaligu waa af guda weyn oo laga heli karo wixii af looga baahnaa oo dhan, waana hodan aan marnaba lagu sheegi Karin baaqinnimo. Dhan loo rogoba waa looga dherгаа..Waxaa taasi ku tuseysaa sida uu afka Soomaaligu u yahay mid aad u xeel dheer oo ay kabuuxdo murti qoto dheer.

Af Soomaaliga, sida dhammaan hiddaha iyo dhaqanka dadka ku hadlaa ay ku dhisnaayeen, waxa la isugu soo gudbinaayay dhihid ama sheegid iyo xasuus uu facba faca ka danbeeya u dhiibaayey. Ma ay jirin qoraallo lagu kaydiyo suugaanta iyo aqoonta ay dhaqanka u lahaayeen soomaalidu, mana ay jirin far u gaar ah afka soomaaliga oo qorani. Taasi waxa ay sababtay in ay xikmad iyo cilmi-dhaqameedka ummadda soomaalidu - tusaale ahaan xiddigiska, saadaasha hawada iyo daawaynta dadka iyo xoolaha - uu in badan lumay oo aanu lahayn tixraac iyo kayd in toona. Afka Soomaaligu waa af da'weyn, laakiin waxaa la suntay sannadkii 1972.

2.Wakhtgii Gumeysiga

Marka laga soo bilaabo 1506 oo ahayd markii (Boortaqiisku) uu soo galay xeebta Baraawe.

Isaga oo ku qalabaysan ciidan ka kooban 6000 oo askari.

Illaa wakhtigaa Soomaaliya waxay noqotay meel dawladahaa shisheeye ay ku hirdamaan.

Carabta, Faransiiska, Talyaaniga, Ingriiska , Sawaaxiliga iyo Xabashida intubu faragelin laxaad leh ayey ku hayeen cariga Soomaalida, taas oo aanay marnaba yarayn faragelinta lagu hayay ummadda soomaaliyeed.

Taas oo ugu danbayntii dhaxalsiisay ummadda Soomaaliyeed in dhulkoodii lakala qoqobo.

Oo qaybu yaryar loo kala qaybsado.

Si kastaba ha ahaatee waxay Soomaalidu ku guuleysatay in ay dhaqankoodii, sharaftoodii, diintoodii iyo afkoodiiba ay ilaashadaan.

Waxaan doonayaa in aan halkan ku xuso saddex(3) qolo oo kala ah **Carabta, Talyaaniga iyo Ingiriiska.**

Saddexda qoloba waxay quudaraynayeen in afkoodo noqdo ka wadanka Soomaaliya lagu maamulo ..

Waxaa ugu horeeyay oo isku dayey qoraal af-Somaali ah waddanka Somaaliya, Sheekh Yuusuf Alkawneyn waxaa uu geeska afrika yimid qarnigii saddex iyo tobnaad, isaga oo ka yimid xaggaa iyo waddamada carabta. Ujeedada ugu weyn ee uu Somaaliya u yimid waxa ay ahayd barista Qur'aanka dhalinyarada Somaaliyeed iyo faafinta diinta Islaamka. Habka uu isticmaalay waxa uu ahaa isagoo afka carabiga ku qoray oo dhawaqana Somaali ka dhigaya. Qoraalkaas waxaa la yidhaahdaa **Harakaat**. Waxaa fartaa loo bixiyey markii danbe (far wadaad).

Waxaa kale oo isna far qoraal Somaali ah sameeyey Sheekh Aweys ibn Maxamad al-baraawi. Waxaa uu isticmaalay luuqad lahjad ahaan kamid ah afka Swaahiliga isagoo ku qoray Qasaa'id, gabayo iyo amaan fara badan.

!920 ayey ahayd markii Cismaan Cali Yuusuf uu qoray farsoomaalida (cismaaniya) Talyaanigu diidmo xoog leh ayuu ka muujiyey isaga oo doonayey in aanay Soomaalidu far yeelan.

Far Borama/Far Gadabuursi

Sannadku markuu ahaa 1933 ayaa Sheekh Abdulraxmaan Sheikh Nuur oo ahaa sheekh reer Borame ah ayaa isaguna far cusub asaasay oo Soomaalidu u bixisay Far Borame amma Far Gadabuursi.

Fartaa taaba galkeedu muu dhaafin agagaarka Borame

Waxaan kaloo halkaan aan ku xusayaa dad badan oo isku dayey sidii ay far Somaali ah u sameyn lahaayeen. Muuse galaal waxa uu kamid ahaa raggii wax ku

soo bartay waddanka Ingriiska haddanna u riyaaqsanaa in af-Somaaligu lagu qoro xuruufta af carabiga.

Waxaa isna isku dayey in uu far Soomaali qoro Xuseen Sheekh Axmed kaddare oo ka mid ahaa aqoonyahanaddii badnaa ee qorista af-somaaliga dadaalka weyn u galay, waxa uu isticmaalay qoraal uu ku qoray farta laatiinka ama Roomaanka.

Intaaso qof ee aan ku soo xusay qoraalkaygan, iyadoo dhamaantood dedaal u galay qorista farsoomaalida haddana midna umay taabagalin

3.Xoriyadda dabadeed

Markii xoriyadda la qaatay muddo ka dib ayaa guddiyo loo saaray in ay qaadaa dhigaan oo ay gorfeyyaan siddii loo heli lahaa qoraal uu afsoomaaligu yeesho waxaa laysku dayey in loo sameeyo Afsoomaaliga far lagu qoro taas oo ummadda Soomaaliyeed baahi weyn u qabtay. Saddex farood ayaa falaqaynta ugu weynaa laysla qaada dhigay tii ku haboon qorista af-somaaliga.Waxa ay kala ahaayeen:Cusmaaniya, Carabi iyo Laatiin, gorfayntaasi muddo dheer ayay qaadatay iyadoo is afgaranwaa xoog lihi uu ka dhashay tii la qaadan lahaa..

Haddab halkan waxaan ku falanqayn doonaa doodihii saddexdaa farood.

Farta Cismaaniyada

Haddii aan ku bilaabo farta Cismaaniyada. Qoladdii ku doodaysay in farta cismaaniyadda la qaato waxay ku doodayeen in fartani ay ku haboontahay in laqaato iyadoo sabab uga dhigayey in ay dhawaaqa ku fiicnaytahay, balse dhaabadda ugu weyn ee ka hortimid waxay noqotay dhanka farsamada oo dhibaato balaadhani ka hortimid taas oo ay ka mid ahaayeen in qalab cusub oo ka kooban madbacado, qalabka wax lagu qoro oo dhaqaale aanay awoodi karayn dawlad yar oo curdin ah . Waxa kale oo lagu diiday siyaabo badan oo la xidhiidhay dhinacyo badan oo kamid ahayd iyadun a siyaasada. Haddii aan dib ugu laabta

dhanka farsamada waxaa jiray aqoonyahano badan aay sheegay in ay dadka ku noqonayso dhib. Maxaa yeelay dadku waa inay bartaan farta Carabiga .Caqabaddii ugu weynneed ee farta Cismaaniyada waxay noqonaysaa culays farsamo oo dhaqaalo xoog leh u baahday.

Farta Carabiga

Farta carabiga waxay ahayd mid aad iyo aad mudnaan gaar ah ku leh ummadda Somaaliyeed, maxaa yeelay dadka Somaaliyeed oo ah 100% muslim, waxay ka eegayeen farta Carabiga dhanka diinta oo ah mid ku qoran Qur'aanka kariimka iyo sunnada Nebiga (scw). Dadka somaaliyeed qiyaas ahaan in badan oo ka mid ahi waxay ahaayeen kuwa qori kara akhriyana kara farta Carabiga, waayo waxay ahaayeen kuwa wax ku bartay dugsiyada qur'aanka kariimka. Qoyska Somaaliyeed waxaa caado u ahayd in ay ilamahooda kula dadaalaan siddii ay u helilahaayeen dugsi oo ay ku bartaan qorista iyo akhriska qur'aanka kariim. Taana waxay ahayd mid ku faafsan gayiga Somaaliyeed miyi iyo magaalo amaba reer Somaaliyeed meel kasta oo ay joogaan. Arrinkaan waxaa aad u xoojinayey caqiidada diinta islaamka oo ay rumaysan yihiin dadka Somalayeed. Sidaas darteed waxaan halkaa ka arkaynaa in ay aad u fududahay qorista afka Somaaliga iyadoo la adeegsanayo xuruufta Carabiga. Laakiinse dhibaatadu waxay ka timid farta Carabiga oo aan lahayn shaqalada kala ah (O, I, U, E), la'aantoodna aan suurtagal ahayn in la qoro far Somaaliga.

Farta Laatiin

Farta laatiinka waxay ahayd farta ugu fudud uguna fiican xagga barashada. Adeegsiga farta Laatiin waxa ay ummadda somaaliyeed ugu fududayd dhanka dhaqaalaha iyo qorista, waayo adeegsiga farta laatiinka uma baahnayn dhaqaalo badan iyo in la abuur qalab loo adeegsado qoristeeda. Waxaa aad u cad in farta

laatiinku ay kaga duwayn faraha kala iyada oo hodan ku ah shaqalada badan ee af-somaaligu u baahnaa ama aan laga maarmin markii far Somaaliga la qorayo. Iyada oo rag badan oo guddiggi farsoomaalida ku jiray aanu dabool ka saarayn in uu Laatiinku yahay tan ugu fudud ee laqaadan karo, haddanna muran xoogle ayaa ka dhashay, taas oo rag fara badan oo u janjeedhay in far carabi afka lagu qoro ay mucaaraddad xoog leh ay ka muujiyeen. Taas oo mararka qaarkood ummadda soomaaliyeed loogu tiraabayey in haddii far laatiinta la qaato laga fogaanayo diinta Islaamku, taas oo mararka qaarkood lagu turjumay in laatiintu ay tahay **`laa diin`**.

Duruufahaa badan awgood xukumaddii rayidka aheyd waxay ku noqotay dhibaato ay maareyn u waayeen oo aad ugu adkaatay in ay go'aan ka gaadhaan xuruuftii la dooran lahaa ee lagu qori la ahaa farsoomaalida.

Markii uu afgambigu ka dhacay dalka Soomaaliya ee ay cidamada milatarigu la wareegeen, dardar cusub ayaa bilaabmatay oo lagu dhiiri galinayo qorista farta Soomaaliga taasi waxay usoo dadajisay in go'aan la qaato.

Haddaba go'aan qaadashadii waxay u fududaatay Golihi Sare ee Kacaanka oo xukunka dalka afgambi kula wareegay sannadkii 1969kii, oo sannadkii 1971dii u xil saaray guddiga Af Soomaaliga inuu soo diyaariyo buuggaagta dugsiga hoose iyo kuwo waxbarashada dadka waaweyn. Saddex sano ka dib markii ay xukunka la wareegeen waxay dawladdii millitiraga aheyd ku dhawaaqday in Afka Soomaaliga lagu qorayo xuruufta Laatiinka, iyada oo la tixgeliyey in xuruufta laatiinku fududahay, dhaqaale ahaanna ka habboon tahay xuruufihii kale. Isla markiiba waxaa lagu dhawaaqay in Af Soomaaligu yahay luuqadda rasmiga ee Soomaaliya, laguna isticmaalayo dhan walba hawlaha bulshada. Taasi waxay keentay in shaqaalihii lagu wargeliyey inay qoridda Af soomaaliga ku bartaan muddo gaaban, qofkii baran waayana waayayo shaqadii uu qaranka u hayey.

Go'aankaasi wuxuu noqday guushii ugu weynayd ee usoo hoyatay Afsoomaaliga.

Waana wax qabbaddka kaliya ee lagu xasuusan doono taliskii militariga ahaa.

4.Marxaladda uu joogo maanta iyo sidii loo badbaadin lahaa

Mahad ballaadhan waxaa leh guulleheenna sharafka badan oo inoo sahlay inaynu yeelano af gooni ah oo aan bulshada kale ee caalamka kaga duwanaanno.Ammaanna waxaa leh guddigii hirgaliyey far u yeeliddiisa.

Bulsho kasta hor u marka afkeedu wuxuu ku xidhan yahay hadba sida ay u dhawrtaan afkooda. Afkeennu wuxuu soo maray marxalado kala duwan, waxa uu lahaa dad badan oo dhawra si toos ah iyo si dadbanba ayaa jirtay, taasoo ka duwaneyd tan maanta uu ku jiro oo u eg inaanu ehel lahayn kadib markii cidkastaa ku tumatay oo siday doonto ka yeeshay, afafkii kale ee doolka ahaa ay ku bateen nin walibana sidii oo doono u amma ay la noqoto u qoray.

Bulsha weynta Soomaalyeed afka isku si uguma hadlaan, qaybiba dhinac bay badisaa, waxaase la isku raacsan yahay in reer miyyigu afka u badshaan. Taa macneheedu maahan reer magaalku afka ma yaqaan ee dabcan in ay danohooda yar yar ku qabsadan waa ka yaqaannaan, hasa yeeshee inta afka ka eexata badiba waa reer magaalka.

In muddo ahba waxaa isa soo tarayey dadka afka siday doonaan ugu hadlaya oo marba dhinacay doonaan u adeegsana.

Dalleensiga erayada qalaad adeegsigooda ee noqotay mid qof kastaa ku dhaqaaqay waxay horsed u tahay dabar go' ku dhacaya afka.

Waxaa wax laga qarracmo ah in erayo aan sinji iyo sawrac toona u galin afkeenna lala hoos rooro, loona ekeysiiyo afkeenna, taasoo ah meel kadhac iyo maamuusid la aan loola muraaday afka.

Qofkasta waxaa habboon in uu afkiisa ilaashado kana ilaaliyo erayada doolka ah oo uga soo tallaabaya soohdimaha fog, kana feejignaado wax kastoo afkiisa bah dili kara.

Qofka soomaaliga ahi markuu hadlayo oo aanu u fiirsan hadalkiisa waxaa afkiisa ka soo butaacaya erayo af carbeed ah ama ingiriis, talyaani ama af kale ah oo soo doolay.

Haddii aynu baadhitaan ku samayno erayada ku dhex milmay afkeena nus qarnigii la soo dhaafay, waxaa soo baxday in yihiin tiro aan la soo koobi Karin, haddii aan laga fiirsan oo si dhab ah la isaga dhawrinna dhibaato weyn ayaa afkeena ku habsan doonto mustaqbalka.

Dhibaatada kale waxay tahay af soomaaliga nafsad ahaantiisa ayaanba la isku raacin, ha noqoto qoraal ahaan, naxwe ahaan iyo dejinta afka, taasi waxay ku abuurtay dhibaato kale, oo haddii xataa la heli lahaa af qoran, oo la isku wada raacsanyahay, waxaa la samayn lahaa manhaj carruurta yaryar loo qoondeeyey laakiin, nasiib daro taasi illa iminka lama helin. Markaasi waxa ay aniga ii la muuqataa in marka hore inta ay isu yimaadaan dadka isbidaya inay aqoon u leeyihiin aqoonta afafka iyo afka soomaaliga, iyadoo lala kaashanayo dadka soomaalida in la helo qoraal lagu daryeelayo farta Soomaaliga oo laysla meel dhigo.

Manhajna si uu u noqdo mid taabbagala, waxa uu u baahan yahay in marka hore la ogaado luuqadda uu ku salaysan yahay; waa in ka hor inta aan la dhaqan galin manhajka cusub, la diyaariyo qalab (sida buug, qaamuus cilmiyeedyo, iwm) iyo xirfadleyaal wax ku bari kara luuqaddaas. *Waxaa kale oo loo baahan yahay qaamuus weyn oo heer ummadeed gaadhsiisan. Qaamuus sidaas ah waxaa ugu horrayn ka faa'iidaysan lahaa dadka wax qora oo dhan, kuwas oo uu qoraalkooda marba marka ka dambeeya isu soo dhoweyn lahaa, haddii aanu ugu dambaynta midayninba. Marka xigana waxaa wax ka korodhsan lahaa dhammaan dadka xiiseeya afka, qoraalka iyo suugaanta.*

Arrinka kale ee meesha yaalaa waxa weeyey erayada af lee yahay in qaamuus iyo qoraal lagu koobaa wax dhib badan ma aha, ummad walba oo af lihina taas waa ay samaysay. Weliba intaas uun ma aha ee afafka qoran badankoodu maanta waxay

ku jiraan kumbiyuutarka kaas oo laga heli karo eray walba iyo macnihiisa iyo dhigaalkiisa

Waan arkay qaamuuska Yaasiin Cismaan Keenaddiid uu qoray iyo qaar kale oo ka dambeeyeyba, waxayna ahaayeen bilaw wanaagsan oo bogaadin iyo ammaan leh. Laakiin lagagama kaaftoomi karo, sinaba, qaamuuska guud ee af soomaaligu u baahan yahay. Bal aynu isweydiinnee imise eray baa qaamuuskaas ku qoran? Boqolkiibase imisa ayey ka noqonayaan af soomaaliga xitaa intiisa joogtada loogu hadlo? Dabcan waxaan filayaa in ay aad iyo aad u koobanyihiin.

Waxa kale oo lama ilaawaan ah qadarisna mudan buugga **Barashada naxwaha afsoomaaliga** ee ay qoreen **Cabdalla Cumer Mansur iyo Annarita Puglielli** kaas oo dulucdiisu tahay qaybaha naxwah afsoomaaligu oo baahi weyn loo qabay wax tar weynna u yeeshay ummadda Soomaaliyeed meel kasta oo ay joogaa. Buugaasi wuxuu u fududeeyey ardayda soomaalida in ay bartaan naxwaha afkooda hooyo . Su'aasha kala ee iyaduna is waydiinta mudane waxay tahay afsoomaaligu ma guulaysan doono inta uu qofkii waxbartaaba wax soosaarkiisa maskaxeed la magangelayo af iyo dhaqan kale, taasi ha ka ahaato hawl yaraysi amaba danaysiye. Waxaan filayaa taa jawaabteedu inay tahay Af soomaaligu ma guulaysan doono, halka uu taagan yahayna hore ugama dhaqaaqi doono, inta aan la helin dad u quudha ulana badheedha in ay geliyaan dhammaan culuunta jirta iyo kartida halabuur, hawl kastaba taasi ha lahaatee.

Waxa kale oo xusid madan kobcinta iyo xoojinta afsoomaaliga in ay dadka aqoonta lihi afkooda siin karaan waxaan tusaale u soo qaadanayaa waxaan ku arkay maqaal aan dhowaan ka akhriyey Ibraahin Maygaag Samatar. Maqaalkaas oo quudh ah inta aan xusuusan ahay waxaan ka bartay saddex eray oo loo adeegsaday qaab igu cusub aad iyo aad aan u jeclaystay sida habboon ee cilmiyaysan. "Tab iyo xeel" ayaan markii koowaad la kulmay iyaga oo noqday "strategy and tactics". Ka kalena waa "kudhac" oo noqday "initiative" iyo "creative". Markaas halkaa waxaad ka

dhadhansanaysaa haddii aqoonyahaniintu dadaal muujiyaan in afkeenu horomar wax ku ool ah gaadhi lahaa.

5.caruurta qurbaha sidii afka loo barilahaa

Ma ogtahay barbaareey

Waxa loo buseelaa

Ama qurux ku caan baxay

Ama laysku baantaa

Ama lagu bogsoodaa

Kal bugtaa ku faydaa

Kugu deeqa baashaal

Guri bila ku magac dheer

Hablaheenna bilicdiyo

Biligiyo ilwaadka leh

Bilcantii shisheeye ah

Ninka beegsanaayow

Waxaan kaaga baqayaa

Inaad baadi noqotee

Cidla baylah keligaa

Yaanu bahalku kaa helin

Isu buri geyaankaa

Barta gogoshu kuu taal

Bahda lagama maarmaan

Bud-dhiggaaga koowaad

Baaqaygu waa kaas.

Tix aan ka soo qaatay(Hadraawi)

Markii ay burburtay dawladdii dhexe ee Soomaaliya dad aad u fara badan oo Soomaali ah ayaa Qurbaha soo doolay. Haddaba caruurtii iyaga oo da' doodu yar yar tahay Qurbaha la keenay ama kuwii ku dhashay qurbaha ayaa luuqaddii af Soomaaligu ka sii suulaysaa. Waxaa is waydiin leh ilaa xadkee ayay muhiim tahay in carruurta la baro luqadda af Soomaaliga? xidhiidhka intee le'eg ayaa ka dhexeeya Luqadda iyo dhaqanka ama luqadda iyo Diinta?. Carruurta yaryar ee ku barbaara ama ku dhalata qurbaha waa lagama-maarmaan in la baro afkooda hooyo. Dhallaanku waa inay dareemaan inuu leeyahay af hooyo oo soo jireen ahaa, uuna ka dhaxlay awoowayadii iyo ayeeyooyinkiisii hore. Waxaa cilmiyan loo ogaaday xataa dhallaanka ama aan aqoon fiican u lahayn afkiisa hooyo, inay ku adag tahay barashada af kale. Dhallaanka aan la barin afkooda hooyo, sida badan, waxaa dhacday markuu qofka weynaado inuu dareemo qoomamayn ah maxaan afkayga u baran waayey. Dhibaato weyn ayaa ka hor imanaysa ilmaha ka taga barashada afkiisa hooyo, waana wax si dhab loo arkay ee ma aha mid la iska malaáwaalay. Ilmaha waxaa ku dhacaya ama uu dareemi doonaa markuu weynaado sida qof aan lahayn ab iyo isir iyo dhaqan toona, waa sida geed jirrida laga gooyey ama la xidid siibay oo kale. Waxa kale oo la iska fahmi karaa in ilmahu uu ku dhex lumo labada dhaqan iyo labada afba, midkoodna inaanu si fiican ula qabsan, oo uu ku lumo dhexdooda., taas oo horseed u noqon karta in da`yarta soomaaliyeed ay abtirsiimadooda Soomaaliyeed ka suusho.

Waaya-aragnimadayda qofnimo waxay i bartay in uu ubadku markay gurigooda joogaan afkooda lagula hadlo, isla markaana marka laga caawinayo casharka dugsi (iskuulka) loogu sheego ama loogu sharaxo afkooda hooyo inuu yahay ilmaha si fiican u barta afkiisa hooyo iyo afka kalaba

Waalidiintu waa in ay carruurtooda ay baraan afkooda hooyo, inay u akhriyaan sheekooyin ama afka uga sheegaan. Waxa arrin aad u qiima badan ah muhiimna ah kula hadalka carruurta afkooda hooyo. Waxaad arkaysaa mararka qaarkood dad ilmahooda af noorwiji kula hadlayo, sababna uga dhigaya ilmaha ma fahmayo

af-soomaaliga, sidaad darteed waa inaan af-noorwiiji kula hadlaa. Waxaa ka habboon afkooda hooyo in lagula hadlo.

Markaan u soo laabto macalimiinta afka soomaaliga ee aan ka midnahay waa kuwa laga sugayo in ay xilweyn iska saaraan sidii ay ubaddka ay macalimiinta uyihi ay u jeclaysiin lahaayeen si ay u bartaan afkooda hooyo taas oo badbaado weyn u noqon karta ubadka soomaaliyeed ee qurbaha ku barbaaraya in ay afkooda kobciyaan oo uu unoqdo waxay ku faanaan.

Markaa inta wakhtigeedu imanayo afsoomaaliga si cilmiyaysan oo laysla ogol yahay loo qori lahaa waa in nin waliwba kordhiyaa sidii uu ugu dadaali lahayd in ardaydaad uu baro isticmaalka erayo badan, weliba erayada aad isleedahay wey sii tirmayaan aad inta badan is xilsaartaa in aad u dhigto.

Waxan markale idin xauusinayaa in ay aad muhiim tahay inla helo mareeg lagaga doodo, ereybixinta iyo habka loo dayactirayo afsoomaaliga.

6. Gabagabo

Afka horumarkiisu waxa uu had iyo jeer ku salaysan yahay heerka nolosha iyo dhaqanka dadka ku hadla afkaas, islamarkaana heerka iyo nooca dhaqan-dhaqaale ee bulshadaasi ay u nooshahay ayaa seesa eraybixinta iyo abwaanka afkooda.

Tusaale ahaan afka soomaaligu waa mid ku hodan ah marka loo eego noloshii dadyowga Geeska Afrika degganaa oo ku ekayd heer xoolo-dhaqato iyo beeralay ilaa qarnigii tegay horraantiisii. Qaninnimadaasi waxay fure u noqon kartaa horumarinta afka laftiisa haddii si xeelad leh loo qabadsiiyo u adeegsiga cilmiga iyo tiknoolajiyadda cusub.

Bulsho kasta oo adduunkan korkiisa ku nooli waxay leedahay af ay isku afgarato iskuna fahanto, afkuna wuxuu ka mid yahay waxyaabaha gundhigga u ah jiritaanka binuaadanka. Hadalku wuxuu dadka ka caawiyaa soo gudbinta fikirka, aad bayna u adkaan lahayd in la malaàwaalo fikirka qofka iyadoon lagu muujinLuqad.

*Iyana waxaa xusid mudan in aan halkan taabtu fikradda **abwaan Gaariye ee abwaanku ku doodayo qofkastaa fikirkiisu wuxuu ku xidhanyahay innta kalmadood ee uu yaqaanu, fikirkaa professerku waxay ku tusaysaa sida uu afku u yahay nimcada ilaahay ku manaystay binu aadanka.***

Waxaan ku soo gunaanadayaa afsoomaaligu waxa uu ka soo jeedaa suugaan aad u xeel dheer iyo aftahannimo ay leeyihiin gabayaaga soomaalidu. Taasina waxay ka badbaadisay in uu dabargo'o sida afaf kale oo badan oo ka suuley dunida. Dhinaca kale dhaqanka reer-guuraanimadu waxa uu aad u adkeeyey raadraaca iyo helitaanka xaqiiqooyin ku saabsan taariikhda dhabta ah ee dadka ku nool Geeska Afrika. Gaar ahaan Soomaalidu waxa ay ahayd ummad aan lahayn degaan rasmi ah, sidaa darteed way adag tahay sida loo helo hanti raagta oo ay ka tageen dadkii hore (sida qalab farsamo, maacuun, farshaxan, iwm.).

Iminka iyo haatan waxaa loo baahanyahay in afkkasoomaalga la daryeelo iyadoo xilkaasi saaran yahay aqoonyahanka soomaaliyeed meel kasta uu joogo.

Waxaan ku soo gunaanadayaa hees ka mid ah suugaantii alla haw naxariistee **Abwaan Xasan Sheekh Muumin** wuxu lahaa suugaan aad u tiro badan oo had iyo jeer dhiiri galisa waxbarashada.

Waxaan ahay waadiga dugsiyadaa
Waxaaan ahay waanada macalinkaa
Waagii baryaba, Ubax laga waraabshoo
Waxan ku warwereynaa
Wadankiina wax ubarta
Oo xambaraara wajibkiisa
Wahsan mayno
Waaban mayno
Warwareegi mayno
Weec weecan mayno

Guul wacan

Cadow ka waabto

Nolol wanaagsan iyo barwaaqo

Nabad lagu wadaago

Haku waaro wadankeenu

Waddankeenu waa

Wadnihii jidhkeena

Waraabinaayey dhiigoo

Waan ku wardiyeynaa.

Waxan wacad ku qaadnay

Gayigiina wax ubarta

Oo ka jira waxyeelada .Ma dhamaystirna heestani

(heestan waxa midhaheeda curiyey Xasan Sheekh Muumin 1970kii.Waxa ku luuqeyn jirey Alla ha unaxariistee Abwaan Maxamed Mooge).

Qore: Abdi Mohamoud Handulle